

Dadka qaarkii ayaa laga yaabaa in ay u baahan yihiin tallaalo dheeraad ah



Dadka qaarkii waxay **uga badan tahay in ay ku dhacaan jirooyin halis ah** oo kaga timaada caabuqyada waana in la siiyaa tallaalo dheeraad ah si loo ilaaliyo. Waxaa ku jira dadka la nool bukaanada joogtada ah ee saameeya xubnahooda muhiimka ah iyo nidaamkooda cudur iska-difaaca



Tallaalka **Cagaarshowga A** waxaa u baahan dadka khatarta sare ugu jira in ay ku dhacdo cagaarshowga A, oo ay ku jiraan kuwa qaba cudurka beerka iyo qoysas laga soo tabiyey in uu qof cudurkaa ku dhacay uu ku jiro.



Cagaarshowga B Tallaal dheeraad ah ee cagaarshowga B ayaa isaguna loo heli karaa dadka uu hayo caabuqa beerka ama kuwa khatarta sare ugu jira in caabuqaas ku dhaco (sida caruurta ay dhaleen dumarka qaba cagaarshowga B ama qof leh lamaane ama xubin qoys oo caabuqaas qaba. Weydii Dhakhtarkaaga Cudurada Guud in adiga ama ilmahaaga ay tahay in ay qaataan tallaalka cagaarshowga B



Qaaxada Tallaalka qaaxada (The BCG vaccine) waxaa u baahan caruurta iyo dadka waaweyn ee ku nool xaafadaha ay ku badan tahay cudurka qaaxada. Dadka ka tirsan xubnaha dhow ee qoyska ee qaba cudurka qaaxada ayaa sidoo kale u baahan tallaalka BCG.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan hagista diiwaan-gelinta waqtigan xaadirka ah ee NHSE-da Buugga Tilmaamaha iyo Siyaasada Daryeelka Caafimaadka ee Aasaasiga ah) iyo Hagaha BMA ee baahiyaha caafimaad ee soo-galootiga fadlan booqo: <https://bit.ly/2hv37zc>



**I have a right to register
and receive treatment from
a GP practice**

Miyaa adiga ama qof muhiim kuu ahi jirran yahay?



Wac lambarka NHS 111 haddii aad si degdeg ah ugu baahan tahay caawinaad caafimaad ama talo, balse aysan aheyn xaalad ah mid halis gelin karta nafta. Waxaad wici kartaa NHS 111 haddii aadan hubin adeega NHS ee aad u baahan tahay.



Talo weydii farmasiilaha deegaankaaga – farmasiilahaaga ayaa ku siin kara talo ku saabsan cudurro badan oo yaryar oo soo noqnoqda, sida shubanka, caabuqyada yaryar, madax-xanuunka, talada safarada ama cune xanuun.



Ballan ka sameyso Dhakhtarkaaga Cudurada Guud haddii aad caafimaad-darro dareento oo aysan ahayn xaalad degdeg ah.



Booqo xarumaha ballan la'aanta la tagi karo (walk-in centre), qeybta dhaawacyada fudud, ama xarunta daryeelka degdegga ah haddii aad xanuun ama dhaawac yar qabto (go'is, murkacasho ama furuuruuc) oo aadan la sugi karin ilaa uu Dhakhtarkaaga Cudurada Guud la furaayo.



Wac lambarka 999 haddii uu jiro qof si khatar ah u xanuunsanaya ama u dhaawacmey noloshooduna ay khatar ku sugan tahay.



Waaxda Shilalka iyo Xaaladdaha Degdegga ah (A&E department) (sidoo kale loo yaqaano qeybta degdegga ah amaba shilalka) waxaa ay wax ka qabataa xaaladdaha degdegga ah ee si xaqiiq ah nolosha u khatar gellin kara. Dadka waxaa loo arkaa loona daaweeyaa sida ay ugu kala baahan yihiin.



UK Health
Security
Agency



UK Health
Security
Agency



Waxaan u soo guurey UK:

La soco tallaaladaada



Tallaaladu waa wadada ugu sahlan ee caabuqyada khatarta ah looga ilaalin karo laftaada iyo qoyskaagaba – waxaa ay kaa caawinayaan in aad caafimaad-qab ku sugnaatid



England, badanka tallaalada waxaa ay NHS ku bixisaa si bilaash ah. Tallaaladu waxaa ay ku ilaalin karaan mudada noloshaada oo dhan. Si caruurta loogu ilaaliyo sida ugu dhakhsaha badan, tallaalada ayaa dhallaanka iyo socod-baradka loogu yaboohaa ka hor inta aysan bilaabin dugsiga. Maaddaama tallaalada sida wanaagsan looga ogol yahay England, sidaa darteed qasab ma ay ah.



Tallaalada waxaa badanaa bixiya kalkaaliyeyaal caafimaad oo jooga rugta Dhakhtarkaaga Cudurada Guud. Kalkaaliyeyasha caafimaad ayaa si gaar ah loogu tababaray inay bixiyaan talo ayna bixiyaan tallaallada. Kalkaalisadu waxaa ay si taxadar leh u baareysaa diiwaankaaga caafimaad, balse inta adiga iyo ilmahaaga ay caafimaad qabaan, baaritaan uu kugu sameeyo dhakhtarka looma baahna.

Caruurta waaweyn waxaa tallaallada qaarkood loogu yaboohaa dugsiyada. Tallaalada dadka waaweyn waxaa caadi ahaan loogu yaboohaa GP-ga Dhakhtarka Cudur Guud ee xaafadaada ama farmasiyaha.



Hadii aadan hubin in adiga ama ilmahaaga aysan qaadanin tallaalada lagu talinayo in England lagu qaato - ka hubso Dhakhtarkaaga Cudurada Guud. Mar walba waad la qabsan kartaa (qaadan kartaa) tallaalada lagu taliyey in England lagu qaato.

Iska diiwaan-gelinta Dhakhtarka Cudurada Guud

Qof walba oo jooga England waxaa uu iska diiwaan-gellin karaa Dhakhtarka Cudurada Guud, wuxuuna arki karaa dhakhtar ama kalkaaliye iyada oo BILAASH ah. Uma baahnid in aad keentid caddeyn aqoonsigaaga ama xaaladda sharcigaaga deganaansho si aad isaga diiwaan-geliso Dhakhtarka Cudurada Guud.

Arintani waxaa kale oo ay khuseysaa haddii aad tahay magangelyo doon, qaxooti, bukaan hooy la' ahan ah ama qof booqasho uga yimid dibadda, si sharci ah ku joog UK ama ha ku joogin.

Waa in aad is diiwaan-gelisaa xattaa haddii aad caaboon tahay oo aad caafimaad qabto. Ma ogaan kartid goorta laga yaabo in aad u baahatid daryeel caafimaad dhakhtarkuna wuxuu kuugu yaboohi karaa adeegyo ka hortag ah oo kaa dhigaya inaad caafimaad qab ku sii sugnaato.



Haddii aad u baahatid qof kula socda ama turjubaan ah, weydii GP-gaaga Dhakhtarka Cudurada Guud.

Qof walba oo jooga Englad waa in uu iska diiwaan-geliyaa Dhakhtarka Cudurada Guud. Waxaad ku arki kartaa si bilaash ah, umana baahnid in aad u keentid cadeyn cinwaankaaga ah

Waxaad faahfaahin sida la isaga diiwaan-geliyo Dhakhtarka Cudurada Guud ka heli kartaa warqaddan oo aad ka heleysid www.nhs.uk/using-the-nhs/nhs-services/gps/how-to-register-with-a-gp-practice

Waxa laga yaabaa inaad bixiso lacag dawooyinka qaarkood ee NHS, laakiin tallaalada joogtada ahi waa bilaash.

Maxaad sameyneysaa haddii aad dhib ku qabtid helitaanka daryeel caafimaad?

Haddii aad weli dhib ku qabtid wac lambarka 111.

Wadamo kala duwan ayaa bixiya tallaalo kala duwan

Way fiican tahay inaad ka hubiso Dhakhtarkaaga Cudurada Guud si aad u xaqiiqsato inaad qaadatay dhammaan tallaalada aan halkan England gudaheeda si bilaashka ah ugu bixinno. Muhiim ma aha sababta aad u geftey tallaaladaas, waxaa muhiim ah in ka aad daba gaadhid, aadna is ilaalisid.

Cudurrada qaarkood waxay ku badan karaan wadamada kale, sidaa darteed waxaa kale oo muhiim ah in la hubiyo haddii aad u baahan tahay wax tallaallo dheeraad ah ka hor intaan u safrin dibadda, si aad u booqato qoyskaaga iyo asxaabtaada - qaar ka mid ah tallaallada safarka bilaash kuma ahan NHS.



Goorma iyo tallaalka ayaa si joogto ah looga bixiyaa England?



Tallaalada waxaa la siiyaa dhallaanka cusub, carruurta yar-yar, dhallinyarada, haweenka uurka leh iyo dadka da'da ah. Waxaad halkan ka heli kartaa waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan jadwalka tallaalka www.nhs.uk/conditions/vaccinations. Haddii aad seegtay mid ka mid ah tallaallada ku jira jadwalka UK, weli waxaad u baahan kartaa badbaadin, xitaa marka aad da'weyn tahay. Weydii Dhakhtarkaaga Cudurada Guud ama kalkaaliyahaaga caafimaad inay hubiyaan in aad u baahan tahay qaadasho ka daba-geyn ah



Ilmaha yar-yar iyo socod-baradkuba waxay u baahan yihiin tallaalka ka ilaaliya caabuqyada carruurnimada oo ay ka mid yihiin jadeecada, qaamo-qashiirka, rubella-da (MMR), rotafayruus-ka, qowracatada, xiiq-dheerta, qoor-gooye, dabeysha, teetanada, cagaarshowga B, Qaaxada iyo in badan oo kale.




Caruurta inta aan dugsiga la geyn waxay u baahan yihiin tallaalka xoojin ah qaar ka mid ah cudurada kor ku xusan. Tani waxay caawineysaa in carruurta loo ilaaliyo si fiican iyo waqti dheerba. Carruurta dugsiga hoose waxaa sanad walba loogu yaboohaa tallaalka hargabka.



Dhallinyaradu waxay u baahan yihiin tallaalka kale oo kordhin ah (xoojin ah) oo loo sameeyo qaar ka mid ah caabuqyadan, oo ay ku jiraan qoor geeye, si loo siiyo badbaado waarta oo ilaa inta ay ka weynaanaayaan. Waxaa sidoo kale loo yaboohaa tallaalka HPV kaasoo ka hortagi kara kansarrada qaarkood.



Haddii aad qorsheynaysid in aad ilmo dhashid, waa inaad markaa hubiso in aad qaadatay dhammaan talaalladaada - gaar ahaan laba qaadasho ah MMR ah – ka hor inta aadan uurka qaadin.



Haddii aad uur leedahay waxaad u baahan tahay tallaalo si adiga iyo ilmahaagaba looga ilaaliyo xiiq-dheerta iyo hargabka (flu). Sidoo kale waa in lagaa baaro (dhiiga iska baartid) caabuqyada sida cagaarshowga B oo hooyadu u gudbin karto cunugga. Ilmaha qaarkood waxay u baahan karaan tallaalka cagaarshowga B oo dheeri ah markay dhashaayan.



Dadka da'da ah waxay u baahan yihiin tallaalka ka ilaaliya hargabka (flu), oofwareenka iyo finanka.

La hadal Dhakhtarkaaga Cudurada Guud ama kalkaaliyahaaga caafimaad si aad u hubiso haddii adiga ama ilmahaagu aad u baahan tihiin tallaalka joogta ah ama tallaallo dheeraad ah.